Wargeyska Mountain View
Sateembar 7, 2016

Qamiis, Sateembar 20……..Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:30 p.m.

Fariinta Agaasimaha

Waxaan ku faraxsanahay in aan macalimiinta cusub iyo shaqaalaha ku soo dhaweeyo Mountain View. Waxaan jira dhowr wijiyo cusub oo saamayn badan ku sameeyay dugsigena. America Neugebauer iyo Jimena Arellano waxay labadaba kaaliyeyaal cusub ka ahaan doonaan fasaladena xanaanada. Samuel Rogers waa tababarahena cusub xagga Jimicsiga (P.E.), Mrs. Corie Bailon waa macalimadena cusub darajada kowaad, Ms. Jessica Keenan waa macalimadena cusub darajada saddaxaad, Miss Sonia Olsen waa macalimadena cusub darajada afaraad, iyo Miss Selene Mansfield iyo Abdulkadir Aden, labadaba waa macalimiin cusub darajada shanaad. Waxaan kaloo dib ugu soo dhaweyneynaa Mountain View ku takhasusaha faragelinta akhriska iyo xisaabta Mrs. Megan Hilton. Waxaan kaloo ku faraxsanahay in aad la kullantid ku xigeenka agaasimahena heerka sare, Chelsea Malouf.

Waxay ahayd wax wanaagsan in aan aragno dhamaan ardaydena iyo qoysaskooda mar kale. Waad ku mahadasn tahay in aad salaanta iga qaaday marka aad is aragnay, kaddibna i weydiisid marka aad qabtid su'aalo. Waad ku mahadasn tahay in aad macalimiintena ku kaalmeysay in ay isu diyaariyaan maalinta in aadan tagin meelaha la marmaro (halls), dugsiga ka hor. Waad ku mahadsan tahay in aad sugtay in aadan soo marin meelaha la marmaro si aad u soo qaadid caruurta ilaa gambaleelka ka dhaco. Waxay ku kaalmeysaa ardayda in ay la socdaan hawshooda. Waad ku mahadsan tahay in aad muujisay xanaano iyo in aad kaalmo gaarsiisay caruurtaada iyo dugsigooda. Waxaan halkaan ku qabnaa bulsho wanaagsan.

Maharajaanka Dugsiga

Waad ku mahadasn tahay in aad timid habeenkena ku soo noqoshada dugsiga iyo maharajaanka bulshada. Macalimiintena waxay dhab ahaan ka heleen in ay si wanaagsan kuu bartaan. In aad waqti gelisay imaashada waxay muujisaa sida aad u danneysid caruurtaada. Waad ku mahadasn tahay! Waxaan farxad kala kullanay maharajaankena! Waxaan jecelnahay in aan u mahad celino dhamaan PTO, iskaashiga bulshada, macalimiinta, iyo dadka kale ee iskaa wax u qabso uga shaqeeyay in lagu guuleysto. Ma ahaan lahayn sidaas, adiga la'aantaa.

Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maalinta Talaadada, marka ay tahay 8:30 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Geeska La-Tallinta

Haddii aadan weli la kullmin la-talliyaha, kaalay Macmacaanka iyo Waalidiinta (Pastries and Parents), Talaadada kowaad bisha, maalinta dhabbanka. Talaadadii la soo dhaafay, Ms. Cassie iyo Ms. Sarah waxay soo bandhigeen macluumaad ku saabsan barnaamijyada la-tallinta iyo ilaha waalidiinta laga helo waaxda la-tallinta. Ms. Cassie waxay kaloo ka hadashay daruusta fasalka iyo asluubta ay iyada iyo Ms. Sarah barri doonaan bil kasta inta uu socdo sannad dugsiyeedka. Bisha Sateembar waxay xoogga saartay siyaasadaha ka soo horjeeda gardareysiga. Laga bilaabo Talaadada kowaad ee dhabanka ah, bisha Oktoobar, waaxda la-tallinta waxay aqoonsan doontaa ardayda kuwa ku celceliya waxa ay ka barteen daruustaan. La soco boostadaada in aad ka heshid aqoonsiga cunugaada.